

ULSARKA CALOOSHA (Gastric ulcers)

Mohamed Ibrahim, MD

Maxay tahay:

Ulcerka caloosha ku dhaca waa cudur aad ugu badan aduunka. Dadku qaar waxay u yaqaanaan gaaska caloosha. Waxaa uu ka yimaadaa markay burburto meel ka mid ah caloosha xuubkeeda halkaas oo aashitada caloosha samayso ay dhaawac usii geysa. Waxaa la dhihi karaa waa nabar caloosha ku yaal.

Maxaa keena:

Caloosha waxay leedahay xuub ama darbigeeta gudaha kaas oo loogu talagalay in uu ka celiyo aashitada ay sida joogtada ah caloosha usamayso si aysan iyada nafteeda isu dheef-shiidin. Burburka xuubka ama nabarka waxa ugu weyn ee keena ayaa la ogaaday inuu yahay bakteeriyada *H. pylori*. Aashitada iyo bakteeriyada markay isku tagaan ayuu dhaawac soo gaaraa xuubka. Waxyaabaha kale oo keena waxaa ka mid ah jiro saa'id ah oo qofka ku dhacda markaasoo qofka la seexiyo qaybta suuxdinta ee cusbitaalka, iyo cudurada ku dhaca habdhiska difaaca.

Astaamaha:

Astaamaha ugu weyn waxaa ka mid ah calool xanuun mararka qaar koodna ku fiicnaada cuntada mararka qaarna kaga sii darto. Taas waxay ku xiran tahay meesha uu nabarka kaga yaal caloosha. Hadii uu nabarku ku yaal meel usoo dhow hunguriga cuntada (sida caanaha) xanuunka way yaraysaa. Qaybta mindhicirka u dhowna way saa'idisaa xanuunka. Inta badan cuntada basbaaska leh iyo kafeega waa kaga daraan xanuuka.

Waxyaabaha lagu ogaado in uu qofku qabo ulsarka caloosha waxaa ka mid ah iyadoo laga qaado dhiiga lagana fiiriyo bakteeriyada *H. pylori*. Sidoo kale hadii laga shakiyo daawo ayaa lagu fiirinkaraa in uu qofku ku bogsado. Mida xaqiiqada lagu ogaan karo waa iyadoo la fiiriyo caloosha gudaheeda qalabka kaamerada wato ee loo yaqaan *Endoscopy*.

Daaweynteeda:

Casrigan cusub daaweynta ulsarka caloosha waa iyadoo qofka la siiyaa daawooyin dilaya bakteeriyada iyo mid aashitada xanibaysa. Inta badan dhibka waxuu ka taagan yahay iyadoo ay dadku si joogta ah u qaadanayn daawada. Qaliin waxaa lagu sameeyaa kuwa lagala baqayo in uu yahay kansar, hadii ay dilaacdo ulsarka, hadii ay dhiigbax weyn ku dhaco iyo hadii ay caloosha xanibto ulsarka.

OGAYSIIS (DISCLAIMER):

Casharkaas iyo warbaahintaas kor ku xusun looguma talagelin in lagu sheybaaro ama daweyo shaqsi. Fadlan la xiriir dhaqtarkaada hadii ay astaamo ku hayaan.